# Mashruuca Grenfell Memory

## Soo-jeedimaha Wadatashiga Rasmiga ah

SU'AALAHA XOG-URURINTA

Wadatashigu wuxuu soconayaa inta u dhaxaysa
**19 Maayo 2026** iyo **11 Agoosto 2026**

LFB
LONDON FIRE BRIGADE

# Tusmada

Horudhaca 1

Adiga kugu saabsan 2

Soo-jeedimaha Mashruuca Grenfell Memory 3

Soo-jeedinta Mashruuca 1: Barnaamijka deeqaha Mashruuca Grenfell Memory 5

Soo-jeedinta Mashruuca 2: Barnaamijka shanta sano ah ee hoyga iyo hawlaha maalinlaha ah 9

Soo-jeedinta Mashruuca 3: Barnaamij wacyigelin ah oo lagu bixinayo tababar iyo xirfado khuseeya ka badqabka dabka 10

Soo-jeedinta Mashruuca 4: Dhimista musiibooyinka mustaqbalka 12

Soo-jeedinta Mashruuca 5: Daraasadda suurtagalnimada 13

Qoondeynta maalgelinta mashruuca 14

Aragtiyada dheeraadka ah 15

Korjoogteynta sinnaanta 18

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah booqo mareegtayada:

london-fire.gov.uk/memory-project/

# Horudhaca

## Waad ku mahadsan tahay wakhtiga aad ku bixisay inaad ka qayb qaadato wadatashigan.

Iyadoo loo marayo Mashruuca Grenfell Memory, London Fire Brigade (LFB) waxay raadineysaa inay abuurto dhaxal macno leh oo waara si loo sharfo 72-kii qof ee ku geeriyootay dabkii Grenfell Tower, iyadoo la taageerayo bogsasho wadajir ah iyo soo kabasho bulsheed.

Mashruucu wuxuu qayb ka yahay ballanqaadka London Fire Brigade ee ku aaddan geeddi-socodka Cawilcelinta Caddaalada ah ee hoos yimaada Heshiiska Magdhowga Madaniga ah, kaasi oo aqoonsanaya saameynta dabkii Grenfell Tower uu ku yeeshay qoysaska marxuumiinta, badbaadayaasha, bulshooyinka North Kensington iyo Grenfell. Wuxuu higsaneysaa inuu si firfircoon dib ugu dhiso kalsoonida oo u wanaajiyo xiriirka.

Wadatashigan waa shuruud ku jirta Heshiiska Magdhowga Madaniga ah ee 2023 wuxuuna ka tarjumayaa ballanqaadka guutada LFB ee ah in bulshada Grenfell si buuxda loogala tashado baaxadda iyo horumarinta hindisayaasha Mashruuca Memory, maadaama ku lug lahaanshaha iyo taageerida dadka deegaanka ay muhiim u yihiin guusha Mashruuca.

Soo-jeedimaha Mashruuca Grenfell Memory ee ku xusan su'aalahan xog-ururinta waxaa la diyaariyay iyadoo loo marayo kaqaybgelin ballaaran oo lala yeeshay qaansheegtayaasha Xallinta Khilaafaadka Kale (ADR), oo ay ku jiraan xubnaha qoyska ee u dhow ee marxuumka, badbaadeyaasha, iyo dadka deegaanka.

Wadar dhan 329 qof ayaa ka qayb qaadatay kaqeybgelinta wadatashiga kahor ee sannadkii hore. Ra'yi-celintooda waxaa lagu soo koobay warbixinta kaqeybgelinta wadatashiga kahor taasi oo wargal u noqotay diyaarinta soo-jeedimaha Mashruuca Grenfell Memory. Hadda waxaan raadineynaa aragtiyo ku saabsan soo-jeedimahan ka socda bulshooyinka North Kensington iyo Grenfell (oo ay ku jiraan xubnaha qoyska ee u dhow marxuumiinta, badbaadayaasha, dadka deegaanka iyo asxaabta).

Dabkii Grenfell Tower wuxuu saameyn qoto-dheer oo naxdin leh ku yeeshay qoysaska u dhow marxuumiinta, badbaadayaasha, dadka deegaanka, iyo bulshada ballaaran ee North Kensington. Inkastoo wakhti laga joogo, saameyntiisa ayaa weli la dareemayaa — ma aha oo kaliya dadka uu sida tooska ah u saameeyay, balse sidoo kale degganeyaasha cusub iyo dadka kale ee u soo guuray aagga tan iyo markii ay musiibadu dhacday.

Ujeeddada wadatashigan waa in la:

- fahmo inaad taageerayso soo-jeedimahan iyo in kale
- aqoonsado waxa aad jeceshahay ama waxa aad walaaca ka qabto
- soo ururiyo talooyin khuseeya waxa ay tahay in wax laga beddelo, la wanaajiyo ama dib loo eego.

Wadarta lacagta maalgelinta ee la heli karo waa **£8.25 milyan** taasi oo la soo-jeediyay in la kharash gareeyo muddo **5 sano ah**.

## S1: Adiga kugu saabsan

Fadlan noo sheeg xiriirka aad la leedahay dabkii Grenfell Tower:

- ◯ Xubinta qoyseed ee u dhow marxuumiinta (tusaale ahaan xaaska/sayga ama lammaanaha; waalidka; ilmaha; walaalaha; ayeeyada/awoowaha; ilmo ayeeyo/awoowe loo yahay, ama qaraabo qoysku magacaabay).
- ◯ Xubin ka tirsan qoyska ballaaran ee marxuumka (oo ay ku jiraan eedooyinka/habaryaha/adeerada/abtiyaasha, ilma adeerada/ilmaabtiyada/habarwadaagaha, iyo asxaabta).
- ◯ Qof ka badbaaday dabka ama horay u degganaa Grenfell Tower.
- ◯ Qof ka badbaaday dabka iyo dadkii horay u deganaa Grenfell Walk.
- ◯ Deggane/xubin ka tirsan bulshada.
- ◯ U doodaha xubin qoyseed ama badbaade u dhow.
- ◯ Kale (Fadlan sheeg)

# SOO-JEEDIMAHA MASHRUUCA GRENFELL MEMORY

Iyadoo lagu saleynayo kaqeybgelinta wadatashiga kahor, waxaan soo-jeedinaynaa barnaamij deeq oo shan sano ah oo ka kooban saddex qeybood iyo afar kale oo soo-jeedimaha mashruuca ah.

Waxaa lagu faahfaahiyay jadwalka hoose iyadoo la kaashanayo qoondeynta lacagaha ee la soo jeediyay.

| Soo-jeedimaha Mashruuca Grenfell Memory | Qoondeynta lacagaha maalgelinta |
|---|---|
| **1 Barnaamijka deeqda ah ee shanta sano ah ee Mashruuca Grenfell Memory ee daboolaya saddexda qaybood ee soo socda:**<br><br>**A. Deeqaha Xusuusta Gaarka ah – £3m muddo 5 sano ah**<br>Loogu talagalay xubnaha qoyska ee ugu dhow marxuumka.<br><br>**B. Deeqaha loogu talagalay da'yarta uu saameeyay dabkii Grenfell – £1m muddo 5 sano ah**<br>Da'yartu waxay xaq u yeelan karaan inay codsadaan haddii ay buuxiyaan shuruudaha mid ka mid ah waxyaabahan soo socda:<br>**a)** haddii ay da'doodu ahayd 16–25 jir xilligii dabka Grenfell Tower, ayna qayb ka ahaayeen bulshada North Kensington iyo/ama Grenfell markuu dhacayay dabka;<br>AMA<br>**b)** haddii uu ahaa da'yar jiray 30 sano ama wixii ka yar xilligii mashruuca la fulinayay, oo leh baahiyo dheeraad ah*, kana soo jeeda bulshada North Kensington iyo/ama Grenfell. (*Baahiyaha dheeraadka ah waxaa ka mid ah la noolaanshaha naafanimo, wajihida caqabadaha bulsheed ama kuwa gaarka ah, ama la kulanka saboolnimo.)<br><br>**C. Deeqaha Adkeysiga Bulshada – £1m muddo 5 sano ah**<br>Maalgelinta loogu talagalay ururada taageeraya kooxaha uu sida aan kala sooca lahayn u saameeyay dabkii Grenfell iyo hawlaha bulsheed ee Sannad-guurada Dabkii Grenfell. | **£5m muddo 5 sano ah (guud ahaan)** |
| **2 Barnaamijka shanta sano ah ee hoyga iyo hawlaha maalinlaha ah**<br>Si loo taageero horumarinta shaqsiyeed, kalsoonida iyo xirfadaha nololeed ee da'yarta da'doodu u dhaxayso 11–15 sano xilliga mashruuca la fulinayo iyo dadka ku nool North Kensington iyo/ama ka tirsan bulshooyinka Grenfell. Si ay u qaabeeyaan oo gaarsiin u sameeyaan ururrada midoobay ee maxalliga ah ee leh sooyaalka shaqo oo habboon. | **£1.5m muddo 5 sano ah** |

# Soo-jeedimaha su'aalaha xog-ururinta ee wadatashiga rasmiga ah

| Soo-jeedimaha Mashruuca Grenfell Memory | Qoondeynta lacagaha maalgelinta |
|---|---|
| **3 Barnaamij wacyigelin oo shan sano ah oo taageeraya dadka ku dhex nool bulshooyinka North Kensington iyo Grenfell ee danaynaya shaqooyinka ka badqabka dabka. Kani wuxuu noqon doonaa barnaamij sannadle ah oo lagu horumarinayo wacyigelinta iyo fursadaha, aqoon-is-weydaarsiyada bartilmaameedka leh, wuxuuna bixin doonaa maalgelin loogu talagalay shahaadada ka badqabka dabka ee ku habboon.**<br><br>Hawlaha wacyigelinta waxay ujeedadoodu tahay in kor loo qaado wacyiga, iyo bixinta macluumaad, hagitaan, iyo taageero loogu talagalay fursadaha shaqo ee ka badqabka dabka iyo aqoonta loo baahan yahay si loo sii wado. Sannad kasta, 12 qof ayaa awoodi doona inay ka qayb qaataan taxane aqoon-is-weydaarsiyo ah (lix) oo ay wadaan xirfadlayaal khibrad u leh ka badqabka dabka oo ka socda London Fire Brigade.<br><br>Fadhiyada aqoon-is-weydaarsiga waxay bixin doonaan talo wax-ku-ool ah, aragtiyo shaqo iyo taageero si loo codsado Shahaadada Ka Badqabka Dabka ee Heerka 3-aad ah oo ay bixiyaan bixiyeyaasha tababarka ee dibadda. Fadhiyadani waxay sidoo kale bixin doonaan taageero iyo talo khuseysa codsiyada doorarka ka badqabka dabka ee heerka koowaad ah ee London Fire Brigade iyo ururada kale.<br><br>Kharashaadka taageeradan iyo shahaadada Ka Badqabka Dabka ee Heerka 3-aad ah waxaa si buuxda u maalgelin doona Mashruuca Grenfell Memory.<br><br>Waxaa la filayaa in barnaamijkani uu horumarin doono awoodda xubnaha bulshooyinka North Kensington iyo Grenfell ee uu saameeyay dabkii Grenfell Tower si ay u helaan koorso ka badqabka dabka ah ayna u codsadaan shaqooyinka ka badqabka dabka ee London Fire Brigade iyo ururada kale. | **£300,000 muddo 5 sano ah** |
| **4 Dhimista musiibooyinka mustaqbalka**<br>Horumarinta agabka waxbarasho/Barashada Socota ee Xirfadaha (CPD) (iyadoo la adeegsanayo daraasadaha qotoda-dheer ee dabkii Grenfell) ka qayb ahaan saamaynaya isbeddelka dhaqan ee deegaanka jira. | **£300,000** |
| **5 Daraasadda suurtagalnimada**<br>Daraasad suurtogalnimo (ballanqaad lahayn) si loo qiimeeyo jiritaanka iyo waaritaanka xarun bulsho oo diiradda saarta dhalinyarada gudaha aagga dabku qabsaday ee Grenfell. | **£60,000** |
| **Qorshaha xaaladda lama filaanka ah** – si loo daboolo wax kasta oo gacan ka geysan kara xarunta bulshada haddii daraasadda suurtagalka ah ay go'aamiso in mashruuca la gaari karo oo noqon karo mid waara iyo/ama haddii dib loo dejiyo iyadoo la eegayo waxyaabaha mudnaanta u leh bulshada ee la aqoonsaday. | **£1,090,000** |
| **WADARTA** | **£8.25M** |

# SOO-JEEDINTA MASHRUUCA 1

## Barnaamijka deeqaha Mashruuca Grenfell Memory

Soo-jeedintan waxaa loogu talagalay barnaamijka deeqaha shanta sano ah ee Mashruuca Grenfell Memory ee daboolaya saddex qaybood oo kala duwan.

## S2: Taageerada deeqaha Xusuusta Gaarka ah

Qaybtani waxay bixin doontaa deeqo ku salaysan mashruuca oo loogu talagalay xubnaha qoyska ee dadkii ku geeriyooday dabkii Grenfell Tower si loo taageero mashaariicda xusuusta gaarka ah ee macno u leh iyaga.

**Intee in le'eg ayaad ku raacsan tahay ama khilaafsan tahay soo-jeedintan?**

◯ Aad ugu raacsan ◯ Ku raacsan ◯ Kuma raacsani mana khilaafsani ◯ Khilaafsan ◯ Aad u khilaafsan

## S3: Ra'yi-celin khuseysa deeqaha Xusuusta Gaarka ah

Fadlan isticmaal qaybta hoose ee bannaan haddii aad rabto inaad si faahfaahsan u sharaxdo jawaabtaada. Waxaan si gaar ah u danaynaynaa inaan fahamno waxa aad ka jeclaatay soo-jeedintan, wixii walaacyo ah ee aad qabto iyo talooyin kasta oo aad dareemayso inay ka dhigi doonaan soo-jeedintan mid si fiican u shaqeysa ama saameyn weyn yeelan kara.

## S4: Taageerada loogu talagalay da'yarta uu saameeyay dabkii Grenfell

Da'yartu waxay xaq u yeelan karaan inay codsadaan haddii ay buuxiyaan shuruudaha mid ka mid ah waxyaabahan soo socda: a) haddii ay da'doodu ahayd 16–25 jir xilligii dabka Grenfell Tower, ayna qayb ka ahaayeen bulshada North Kensington iyo/ama Grenfell markuu dhacayay dabka; AMA b) haddii uu ahaa da'yar jiray 30 sano ama wixii ka yar xilligii mashruuca la fulinayay, oo leh baahiyo dheeraad ah*, kana soo jeeda bulshada North Kensington iyo/ama Grenfell.
*Baahiyaha dheeraadka ah waxaa ka mid ah naafanimada, caqabadaha shaqsiyeed, ama silaca.

**Intee in le'eg ayaad ku raacsan tahay ama khilaafsan tahay soo-jeedintan?**

- ◯ Aad ugu raacsan
- ◯ Ku raacsan
- ◯ Kuma raacsani mana khilaafsani
- ◯ Khilaafsan
- ◯ Aad u khilaafsan

## S5: Ra'yi-celin khuseysa deeqaha da'yarta

Fadlan isticmaal qaybta hoose ee bannaan haddii aad rabto inaad si faahfaahsan u sharaxdo jawaabtaada. Waxaan si gaar ah u danaynaynaa inaan fahamno waxa aad ka jeclaatay soo-jeedintan, wixii walaacyo ah ee aad qabto iyo talooyin kasta oo aad dareemayso inay ka dhigi doonaan soo-jeedintan mid si fiican u shaqeysa ama saameyn weyn yeelan kara.

## S6: Taageerada loogu talagalay deeqaha adkeysiga bulshada

Qaybtani waxay deeqo siin doontaa ururada taageeraya kooxaha sida aan kala sooca lahayn uu u saameeyay Grenfell, iyo sidoo kale maalgelinaysa hawlaha sannad-guurada dabkii Grenfell ee dadka deegaanka.

**Intee in le'eg ayaad ku raacsan tahay ama khilaafsan tahay soo-jeedintan?**

- ◯ Aad ugu raacsan
- ◯ Ku raacsan
- ◯ Kuma raacsani mana khilaafsani
- ◯ Khilaafsan
- ◯ Aad u khilaafsan

## S7: Ra'yi-celin khuseysa deeqaha adkeysiga bulshada

Fadlan isticmaal qaybta hoose ee bannaan haddii aad rabto inaad si faahfaahsan u sharaxdo jawaabtaada. Waxaan si gaar ah u danaynaynaa inaan fahamno waxa aad ka jeclaatay soo-jeedintan, wixii walaacyo ah ee aad qabto iyo talooyin kasta oo aad dareemayso inay ka dhigi doonaan soo-jeedintan mid si fiican u shaqeysa ama saameyn weyn yeelan kara.

## S8: Qoondeynta guud ee barnaamijka deeqaha

Waxaa la soo-jeediyay in saddexda qaybood ee barnaamijka deeqaha ay ka dhigan yihiin £5 milyan oo wadarta guud ee maalgelinta ah:

**A. Deeqaha Xusuusta Gaarka ah** – **£3 milyan**

Loogu talagalay xubnaha qoyska ee ugu dhow marxuumka.

**B. Deeqaha loogu talagalay da'yarta uu saameeyay dabkii Grenfell** – **£1 milyan**

Da'yartu waxay xaq u yeelan karaan inay codsadaan haddii ay buuxiyaan shuruudaha mid ka mid ah waxyaabahan soo socda:

**a)** haddii ay da'doodu ahayd 16–25 jir xilligii dabka Grenfell Tower, ayna qayb ka ahaayeen bulshada North Kensington iyo/ama Grenfell markuu dhacayay dabka;

AMA

**b)** haddii uu ahaa da'yar jiray 30 sano ama wixii ka yar xilligii mashruuca la fulinayay, oo leh baahiyo dheeraad ah*, kana soo jeeda bulshada North Kensington iyo/ama Grenfell.

(*Baahiyaha dheeraadka ah waxaa ka mid ah la noolaanshaha naafanimo, wajihida caqabadaha bulsheed ama kuwa gaarka ah, ama la kulanka silac.)

**C. Deeqaha Adkeysiga Bulshada** – **£1 milyan**

Maalgelinta loogu talagalay ururada taageeraya kooxaha uu sida aan kala sooca lahayn u saameeyay dabkii Grenfell iyo hawlaha bulsheed ee Sannad-guurada Dabkii Grenfell.

**Ma u malaynaysaa in qaabka loo qeybiyay maalgelinta saddexdan qaybood ay si ballaaran ugu habboon tahay?**

◯ Aad ugu raacsan ◯ Ku raacsan ◯ Kuma raacsani mana khilaafsani ◯ Khilaafsan ◯ Aad u khilaafsan

Fadlan isticmaal qaybta hoose ee bannaan haddii aad rabto inaad si faahfaahsan u sharaxdo jawaabtaada.

# SOO-JEEDINTA MASHRUUCA 2

## Barnaamijka shanta sano ah ee hoyga iyo hawlaha maalinlaha ah

Soo-jeedintan waa barnaamij shan sano ah oo loogu talagalay hoyga iyo hawlaha maalinlaha ah si loo taageero horumarinta shaqsiyeed, kalsoonida, iyo xirfadaha nololeed ee da'yarta da'doodu u dhaxayso 11–15 sano ee ku nool bulshooyinka North Kensington iyo/ama Grenfell. Waxaa qaabayn doona oo gaarsiin doona ururrada midoobay ee maxalliga ah ee leh sooyaalka shaqo oo habboon.

### S9: Taageerada loogu talagalay barnaamijka hoyga iyo hawlaha maalinlaha ah

**Intee in le'eg ayaad ku raacsan tahay ama khilaafsan tahay soo-jeedintan?**

◯ Aad ugu raacsan ◯ Ku raacsan ◯ Kuma raacsani mana khilaafsani ◯ Khilaafsan ◯ Aad u khilaafsan

### Q10: Ra'yi-celin khuseysa barnaamijka hawlaha guryaha iyo kuwa maalinlaha ah

Fadlan isticmaal qaybta hoose ee bannaan haddii aad rabto inaad si faahfaahsan u sharaxdo jawaabtaada. Waxaan si gaar ah u danaynaynaa inaan fahamno waxa aad ka jeclaatay soo-jeedintan, wixii walaacyo ah ee aad qabto iyo talooyin kasta oo aad dareemayso inay ka dhigi doonaan soo-jeedintan mid si fiican u shaqeysa ama saameyn weyn yeelan kara.

# SOO-JEEDINTA MASHRUUCA 3

## Barnaamij wacyigelin ah oo lagu bixinayo tababar iyo xirfado khuseeya ka badqabka dabka

Barnaamij shan sano ah oo wacyigelin ah oo taageeraya dadka ku dhex nool bulshooyinka North Kensington iyo Grenfell kuwaasi oo xiiseynaya shaqooyinka ka badqabka dabka. Kani wuxuu noqon doonaa barnaamij sannadle ah oo diiradda saaraya kor u qaadista wacyiga iyo fursadaha, bixinta aqoon-is-weydaarsiyo bartilmaameed leh, iyo bixinta maalgelin loogu talagalay shahaadada ka badqabka dabka ee habboon.

Hawlaha wacyigelinta waxay ujeedadoodu tahay in kor loo qaado wacyiga, iyo bixinta macluumaad, hagitaan, iyo taageero loogu talagalay fursadaha shaqo ee ka badqabka dabka iyo aqoonta loo baahan yahay si loo sii wado. Sannad kasta, 12 qof ayaa awoodi doona inay ka qayb qaataan taxane aqoon-is-weydaarsiyo ah (6) oo ay wadaan xirfadlayaal khibrad u leh ka badqabka dabka oo ka socda London Fire Brigade.

Fadhiyada aqoon-is-weydaarsiga waxay bixin doonaan talo wax-ku-ool ah, aragtiyo shaqo iyo taageero si loo codsado Shahaadada Ka Badqabka Dabka ee Heerka 3-aad ah oo ay bixiyaan bixiyeyaasha tababarka ee dibadda. Fadhiyadani waxay sidoo kale bixin doonaan taageero iyo talo ku saabsan codsiyada doorarka ka badqabka dabka ee heerka koowaad ee London Fire Brigade iyo ururada kale.

Kharashaadka taageeradan iyo shahaadada Ka Badqabka Dabka ee Heerka 3-aad ah waxaa si buuxda u maalgelin doona Mashruuca Grenfell Memory.

Waxaa la filayaa in barnaamijkani uu horumarin doono awoodda xubnaha bulshooyinka North Kensington iyo Grenfell ee ay saameeyeen dhacdooyinkii dabka Grenfell Tower si ay u helaan koorso ka badqabka dabka ah ayna u codsadaan shaqooyinka ka badqabka dabka ee guutada London Fire Brigade iyo ururada kale.

## S11: Taageero loogu talagalay barnaamijka wacyigelinta si loo helo helitaanka shahaadada ka badqabka dabka iyo xirfadaha

**Intee in le'eg ayaad ku raacsan tahay ama khilaafsan tahay soo-jeedintan?**

- ○ Aad ugu raacsan
- ○ Ku raacsan
- ○ Kuma raacsani mana khilaafsani
- ○ Khilaafsan
- ○ Aad u khilaafsan

## S12: Ra'yi-celin khuseeya barnaamijka wacyigelinta si loo helo helitaanka shahaadada ka badqabka dabka iyo xirfadaha

Fadlan isticmaal qaybta hoose ee bannaan haddii aad rabto inaad si faahfaahsan u sharaxdo jawaabtaada. Waxaan si gaar ah u danaynaynaa inaan fahamno waxa aad ka jeclaatay soo-jeedintan, wixii walaacyo ah ee aad qabto iyo talooyin kasta oo aad dareemayso inay ka dhigi doonaan soo-jeedintan mid si fiican u shaqeysa ama saameyn weyn yeelan kara.

# SOO-JEEDINTA MASHRUUCA 4

## Dhimista musiibooyinka mustaqbalka

Barnaamij shan sano ah oo wacyigelin ah oo taageeraya dadka ku dhex nool bulshooyinka North Kensington iyo Grenfell. Soo-jeedintan waxay higsaneysaa in la dhimo musiibooyinka mustaqbalka iyadoo saameyn ku yeelaneysa isbeddelka dhaqan ee sancada deegaanka jira. Waxay horumarin doontaa agabyada horumarinta waxbarasho iyo Barashada Socota ee Xirfadaha (CPD) iyadoo la adeegsanayo daraasadaha qotoda-dheer ee dabkii Grenfell ee xirfadlayaasha ku shaqeeya deegaanka jira.

### S13: Taageerada loogu talagalay agabka waxbarasho ee deegaanka ka jira

**Intee in le'eg ayaad ku raacsan tahay ama khilaafsan tahay soo-jeedintan?**

- ◯ Aad ugu raacsan
- ◯ Ku raacsan
- ◯ Kuma raacsani mana khilaafsani
- ◯ Khilaafsan
- ◯ Aad u khilaafsan

### S14: Ra'yi-celin khuseeya agabka waxbarasho ee deegaanka ka jira

Fadlan isticmaal qaybta hoose ee bannaan haddii aad rabto inaad si faahfaahsan u sharaxdo jawaabtaada. Waxaan si gaar ah u danaynaynaa inaan fahamno waxa aad ka jeclaatay soo-jeedintan, wixii walaacyo ah ee aad qabto iyo talooyin kasta oo aad dareemayso inay ka dhigi doonaan soo-jeedintan mid si fiican u shaqeysa ama saameyn weyn yeelan kara.

# SOO-JEEDINTA MASHRUUCA 5

## Daraasadda suurtagalnimada

Soo-jeedintan waxaa loogu talagalay daahfurka daraasad suurtagalnimo oo madax-bannaan (ballanqaad lahayn) si loo qiimeeyo jiritaanka iyo waaritaanka xarun bulsho oo diiradda saarta dhalinyarada gudaha aagga dabku qabsaday ee Grenfell.

## S15: Taageerada loogu talagalay daraasadda suurtogalnimada xarunta bulshada

**Intee in le'eg ayaad ku raacsan tahay ama khilaafsan tahay soo-jeedintan?**

◯ Aad ugu raacsan ◯ Ku raacsan ◯ Kuma raacsani mana khilaafsani ◯ Khilaafsan ◯ Aad u khilaafsan

## S16: Ra'yi-celin khuseysa daraasadda suurtogalnimada xarunta bulshada

Fadlan isticmaal qaybta hoose ee bannaan haddii aad rabto inaad si faahfaahsan u sharaxdo jawaabtaada. Waxaan si gaar ah u danaynaynaa inaan fahamno waxa aad ka jeclaatay soo-jeedintan, wixii walaacyo ah ee aad qabto iyo talooyin kasta oo aad dareemayso inay ka dhigi doonaan soo-jeedintan mid si fiican u shaqeysa ama saameyn weyn yeelan kara.

# QOONDEYNTA MAALGELINTA MASHRUUCA

## S17: Qoondaynta guud ee maalgelinta mashruuca

Waxaa la soo-jeedinayaa in maalgelinta mashruuca loo qoondeeyo sidan soo socota:

- **£1.5 milyan** Hawlaha degenaanshaha iyo kuwa maalinlaha ah ee da'yarta da'doodu u dhaxayso 11–15 sano
- **£300,000** Barnaamij wacyigelin ah si loo bixiyo helitaanka shahaadada ka badqabka dabka iyo xirfadaha
- **£300,000** Agabka waxbarashada (iyadoo la adeegsanayo daraasadaha qotoda-dheer ee dabkii Grenfell)
- **£60,000** si loo sameeyo daraasad khuseysa suurtogalnimada xarunta bulshada

**Ma u malaynaysaa in habka loogu qeybiyay maalgelinta aaggaga kor ku xusan ay si ballaaran ugu habboon tahay?**

◯ Aad ugu raacsan ◯ Ku raacsan ◯ Kuma raacsani mana khilaafsani ◯ Khilaafsan ◯ Aad u khilaafsan

Fadlan isticmaal qaybta hoose ee bannaan haddii aad rabto inaad si faahfaahsan u sharaxdo jawaabtaada.

# ARAGTIYADA DHEERAADKA AH

## S18: Isticmaalka lacagaha aan la kharash gareyn (tus., miisaaniyadda xaaladaha degdegga ah)

Haddii wax lacagaha maalgelinta aan la kharash garayn (tusaale ahaan, haddii daraasadda suurtogalnimada xarunta bulshada ay go'aamiso in mashruucu aanu shaqayn karin), waa kuwee aagga(-ga) aad mudnaanta siin lahayd ee dib u qoondeynta lacagahaasi?

**Fadlan xulo saddexda doorbidaad ee ugu sarreeya**

- ◯ Deeqaha xusuusta gaarka ah (xubnaha qoyska ee dhow)
- ◯ Da'yarta ay saamaynta ku yeelatay deeqaha Grenfell
- ◯ Deeqaha adkeysiga bulshada
- ◯ Barnaamijka hoyga iyo hawlaha maalinlaha ah (da'aada 11–15)
- ◯ Barnaamij wacyigelin ah si loo helo shahaadada ka badqabka dabka iyo xirfadaha
- ◯ Agabka waxbarashada ee deegaanka jira
- ◯ Kale (fadlan sheeg)

## Fadlan xaqiiji in tani ay tahay jawaabtaada kaliya ee su'aalaha wadatashiga

- [ ] **Haa tani waa jawaabtayda kaliya**

## S19: Ma jiraan wax kale oo aad jeclaan lahayd inaad inoo sheegto?

Fadlan isticmaal goobtan madhan si aad noola wadaagto wixii fikrado, walaacyo, ama talooyin dheeraad ah oo khuseeya soo-jeedimaha Mashruuca Grenfell Memory.

# KORJOOGTEYNTA SINNAANTA

Waxaa NAGA go'an inaan hubinno in qof walba uu fursad u helo inuu si buuxda uga qayb qaato go'aamada khuseeya Mashruuca Grenfell Memory.

Qaybtan su'aalaha xog-ururinta waa **ikhtiyaari**, oo **dhammaan jawaabaha waxay ahaan doonaan kuwo aan la isku aqoonsan doonin**. Si kastaba ha ahaatee, marka aad dhammaystirto qaybta soo socota, waxaad naga caawin doontaa inaan fahamno cidda aan la tashanayno iyo sida ugu wanaagsan ee aan ugu adeegi karno bulshooyinka North Kensington iyo Grenfell. Waan isku barbardhigi doonaa macluumaadkan iyo jawaabahaaga, si ay nooga caawiyaan inaan fahamno aragtida kooxaha kala duwan ee leh Sifaadka La Ilaaliyo.

Fadlan calaamadee **HAL** ikhtiyaar oo loogu talagalay su'aal kasta.

## S20: Da'aadee ayaad ku jirtaa?

- ◯ Ka yar 16
- ◯ 16–18
- ◯ 19–24
- ◯ 25–34
- ◯ 35–44
- ◯ 45–54
- ◯ 55–64
- ◯ 65–79
- ◯ 80+
- ◯ Waxaan doorbidayaa inaan sheegin

## S21: Waa maxay jinsigaagu?

- ◯ Dheddig
- ◯ Lab
- ◯ Waxaan doorbidayaa inaan sheegin

## S22: Aqoonsiga jinsigaaga ma la mid yahay jinsiga aad ahayd markii aad dhalatay?

- ◯ Haa
- ◯ Maya
- ◯ Waxaan doorbidayaa inaan sheegin

## S23: Fadlan tilmaam ikhtiyaarka ugu fiican ee qeexaya nooca galmadaada

- ◯ Khaniis
- ◯ Qajac
- ◯ Leefto
- ◯ Laba jinsile
- ◯ Midna kuwa sare
- ◯ Waxaan doorbidayaa inaan sheegin

## S24: Fadlan tilmaan inaad uur leedahay ama aad fasax umul/aabbanimo ku jirto

| | | |
|---|---|---|
| Uur leh | ◯ Haa | ◯ Maya |
| Fasaxa umusha | ◯ Haa | ◯ Maya |
| Fasaxa aabbanimada | ◯ Haa | ◯ Maya |

## S25: Fadlan tilmaam ikhtiyaarka ugu fiican ee qeexaya diintaada ama caqiidadadaada

- ◯ Diin-laawe
- ◯ Budhiste
- ◯ Masiixi (madaahibta oo dhan)
- ◯ Hinduuga
- ◯ Yuhuud
- ◯ Muslim
- ◯ Diin ma aaminsani
- ◯ Sikh
- ◯ Diin kale (Fadlan sheeg)

  ______________________________
- ◯ Waxaan doorbidayaa inaan sheegin

## S26: Fadlan xulo midka sida ugu fiican u qeexaya qowmiyaddaada/ asalkaaga dhalasho

- Aasiyaan/Aasiyaanka Ingiriiska (Bakistaani/ Bangladeshi/Hindi)
- Aasiyaan/Aasiyaanka Ingiriiska – asal kale oo Aasiyaan ah (Fadlan sheeg)
- Madow ama Madowga Ingiriiska: Kariibiyaan
- Madow ama Madowga Ingiriiska: Afrikaan
- Asal kale oo Madow ah (Fadlan sheeg)
- Shiinees
- Bariga Dhexe: Carab/Faarisi/Turki
- Bariga Dhexe: Waqooyiga Afrika
- Bariga Dhexe: Asal qowmiyadeed oo kale (Fadlan sheeg)
- Asalo isku-dhaf ah: Caddaan iyo Madowga Kariibiyaanka ah
- Asalo isku-dhaf ah: Caddaan iyo Afrikaanka Madow
- Asalo isku-dhaf ah: Caddaan iyo Aasiyaan
- Asalo isku-dhaf ah: Caddaan iyo Bariga Dhexe
- Asalo isku dhafan: Asal kasta oo kale (Fadlan sheeg)
- Caddaan: Yurub/Bariga Yurub
- Caddaan: Ingiriis/Welish/Iskootish/ Waqooyiga Ayrishka/British
- Caddaan: Ayrish
- Caddaan: Asal Kale oo Cad (Fadlan sheeg)
- Asal kale oo qowmiyadeed oo aan kor lagu xusin (Fadlan sheeg)
- Waxaan doorbidayaa inaan sheegin

## S27: Ma isku aragtaa inaad naafo tahay?

- Haa
- Maya
- Waxaan doorbidayaa inaan sheegin

# Soo-jeedimaha su'aalaha xog-ururinta ee wadatashiga rasmiga ah

## Waad ku mahadsan tahay kaqaybgalka wadatashigan

Aragtidaadu waa muhiim waxayna gacan ka geysan doontaa qaabaynta Mashruuca Grenfell Memory ee ugu dambeeya. Ra'yi-celinada oo dhan si taxaddar leh ayaa loo tixgelin doonaa markaan sii horumarinayno soo-jeedimahan.

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid wadatashigan, fadlan la xiriir:

Telefoon: **07385 382 580**

Iimaylka: **grenfell.engagement@london-fire.gov.uk**

## U dir su'aalaha xog-ururinta ee la dhammaystiray:

**Grenfell Memory Project**
**London Fire Brigade**
**169 Union Street**
**London SE1 0LL**

Baqshadaha FREEPOST ayaa la heli karaa marka la codsado.

## Dhammaystirka su'aalaha xog-ururinta onlaynka ah

Haddii aad rabto inaad su'aalaha xog-ururinta ka dhammaystirto onlaynka, fadlan booqo:

**london-fire.gov.uk/gmp-consultation**

ama iskaan garee **koodhkan QR-ka**:

## Ogow wax badan

Si aad u hesho tafaasiil buuxda oo khuseysa Mashruuca Grenfell Memory, iskaan garee koodka QR ama booqo: **london-fire.gov.uk/memory-project/**

## Hel warar joogto ah

Isku diiwaangeli Mashruuca Grenfell Memory liiska boostada – **iskaan garee koodhka QR**

LFB
LONDON FIRE BRIGADE